Xogta Talaabada Sharciga ah ee Daryeelka Ilmaha

S Waa maxay Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee DCYF?

J Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) waxa ay shati siisaa qiyaas ahaan 6,800 oo daryeelka carruurta ah iyo barnaamijyada waxbarashada ubadka iyo goobaha wax lagu baro ilmaha gaaray da'da dugsiga ee gudaha gobolka Washington. Daryeelka carruurta ee shatiga haysta iyo bixiyeyaasha waxbarashada ubadka waxa ay raacaan heerarka tayada aasaasiga ah ee ay dejisay Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC) si uu u xaqiijiyo in ilmaha jooga daryeelka shatiga haysta ay ku sugnaadaan deegaan leh badbaado, caafimaad iyo koritaan.

S Waa maxay guudmarka ka joojintu?

J Waa tallaabo kumeelgaar ah oo ay DCYF isticmaasho si ay u ilaaliso ilmaha. Barnaamijyada daryeelka carruurta masoo hawlgali karto inta ay kujirto hakinta. "Hakin," marka loo isticmaalo xaga tixraaca xaalada shatiga bixiyaha, micnaheedu waxa ay tahay tallaabo hay'ada ay dhaqangeliso oo ay si kumeelgaar ah ku joojineyso shatiga si loo ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, ama badqabka carruurta ka diiwaangashan ama dadweynaha. (WAC 110-300-0443) **https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0443**

S Maxa ku dhacay liisanka marka la joojiyo?

J Marka xarunta daryeelka ilmaha waxaa weeye soo koobitaank guudmar, DCYF waxay wargelisay liisanka qoraalka, iyo xarunta iyo hawlgalkeeda oo la xidhi doona markaba.

Hadii cida liisanka ay ka doodo ka joojinta, waxay rafacaan ka qaadan karaan oo ay hor tegi karaan Administrative Law Judge (Xaakinka Sharciga ee Maamulka, ALJ) si ay uga dalbadaan "joogitaan." Joogitaanku waxay uu u saamaxayaa xaruntu inay furnaato ilaa inta dhagaysiga la qabanayo. Dhagaysiga ALJ ee xogta kiiska iyo go'aaminta sharciga, taas oo ah talaabada ugu danbaysa ee nidaamka rafcaanka.

S Malala noqon karaa?

J La noqoshadu waxaa weeye talaabo sharci oo si rasmi ah loo xidhayo liisanka daryeelka ilmaha, oo ka dhigan in xarunta daryeelka ilmuhu aan dib loo furi karin.

Sharciga gobolka (RCW 43.215) waxa uu u ogolaanayaa DCYF inay la noqoto liisanka marka bixiyaha daryeelka aanu u hogaansamin shuruucda iyo qawaaniinta. Kala noqoshadu waxay ka timaadaa, laakiin kuma koobna, ku xad gudubka shuruucda liisanka daryeelka ilmaha ee soo noqnoqta. Kala noqoshadu waxay dhacdaa marka aan wax talaabo ah la qaadin arrintaas lagaga qabanayo wax.

S Maxa ku dhacay liisanka marka lala laabto?

J Liisanka cida haysta waxay heli doontaa wargelin qoraal ah oo la noqoshada liisankooda ah. Wargelinta waxaa kamid ah sababta ay DCYF u go'aansatay iyo sharaxa xuquuqda nidaamka ee cida liisanka haysata.

Jawaabta wargelinta, cida liisanka haysta waxa ay samayn kartaa mid kamid ah laba shay:

a. Rafcaanka ficilka iyada oo loo gudbinayo dalabka 28 maalmood gudahood Office of Administrative Hearings (Xafiiska Dhagaysiga Maamulka, OAH) ee gobolka iyo Xafiiska Liis Bixinta Daryeelka Ilmaha DCYF; ama

b. Aqbalaada go'aanka DCYF iyo xidhitaanka xarunta 28 maalmood gudahood marka la helo wargelinta.

S Waa maxay ciqaabta madaniga ahi?

J Ciqaabta madaniga ah, ama ciqaabta, waxaa weeye talaabo dhaqan gelin oo ay soo saarto hay'adu. Waxay tani bedeli kartaa heshiiska u hogaansanka liisanka ee xarunta (FCLA) ama liisanka kumeel gaadhka ah. Tusaale ahaan, hadii bixiyaha waxbarashada hore uu diido FLCA ama liisan mamnuucida, ciqaabta madaniga ah ee la soo saaro. Ciqaabta madaniga ah waxay keentaa, laakiin kuma koobna, ku xad gudubka shuruucda liisanka daryeelka ilmaha ee soo noqnoqta. Ciqaabta madaniga ah waxay dhacdaa marka aan wax talaabo ah la qaadin arrintaas lagaga qabanayo wax.

S Maxaa dhacaya marka ay soo baxdo ciqaabta madaniga ahi?

J Cida liisanka la siiyay waxaa la siinayaa wargelinta marka ciqaabta madaniga ah lasoo saaro. Wargelinta waxaa kamid ah xadiga lacagta ee ciqaabta madanigaah, wakhtiga ciqaabta madaniga ah ay tahay in la bixiyo, sababta ay DCYF u go'aansatay iyo sharaxa xuquuqda nidaamka ee cida liisanka haysata.

Jawaabta talaabada ciqaabta madaniga ah, cida liisanka haysta waxa ay samayn kartaa mid kamid ah laba shay:

a. Rafcaanka talaabada adiga oo loo gudbinayo dalabka 28 maalmood gudaheed OAH; ama

b. Aqbalaada go'aanka DCYF iyo bixinta ganaaxa. Fadlan ka eeg Warqada Ciqaabta Madaniga ah wixii faahfaahinta ah ee ku saabsan bixinta ganaaxaaga.

Natiijada Macquulka ah iyo Sharaxa Sharciga

Xaqiijinta: Go'aanka maxkamada ee xad gudubka, xaqiijinta, ama helitaanka go'aanka maxkamada hoose.

Diidmada: Go'aanka maxkamada ee meesha lagaga saarayo kiiska eedeysanaha. Diidmadu waxay noqon kartaa sababo kala duwan, waxaa kamid ah dalabka labada dhinac ee dhinacyada, xalinta laga heshiiyo, diidmada dhinaca rafacaanka qaata iyada oo uu ka qayb galayo rafcaanka, ama xukunka in, sharci ahaan, ayna jirin qaab dhinaca qaadanaya rafcaanku uu ku gaadhi karo natiijada uu ku doonayo rafcaanka. Diidmada OAH, waxay doonto ha noqoto sababtu e, waxa uu siiyaa 20 maalmood mudo ah in ruuxa qaatay rafcaanku uu ku diido soo celinta rafcaanka.

Nidaamka Socda: Oo ay kamid yihiin waxka bedelka 14aad ee Dastuurka Maraykanka, waxa uu damaanad qaadayaa in gobolku uga dhaqmo shakhsiyaadka cadaalad oo uu ilaaliyo xuquuqda shakhsi ahaaneed ee uu ku qaadanayo rafcaanka oo aan lagaga aargoosan liisan haystaha ama lagu xukomu tacadi ama dayacaad ilme.

La qaaday: In meesha laga saaro saamaynta talaabada sharciga ah iyada oo aan meesha laga saaro talaabada rasmiga ah ee lagu soo rogay. Marka si kale loo dhigo, talaaada ayaa sii ahaan doonta talaabada sharciga ah ee hay'ada, laakiin bixiyaha ayaa diidi kara talaabada kadib marka la qaado, inkasta oo ay ku sii jiri doonto duwaanka bixiyaha. Qaadida ayaa loo adeegsadaa guudmarka joojinta marka hay'adu ayna u arag in ay jirto khatar cad oo caruurta haysataya laakiin aanu weli la go'aamin in guudmarka joojinta ay tahay in gebi ahaanba la joojiyo.

Talaabada Lidka ah: Amarka maxkamada, xukunka maxkamada, ama talaabada lidka ah ee ay qaaday hay'adu, meelaha uu gaadho maamulka gobolka, federalka, qabaa'ilka, ama ajaanibku. Waxay keeni kartaa in la xukumo dalbadaha, taas ay macquul tahay inay la xidhiidhaan dabeecada shakhsi ahaaneed, munaasab nimada, iyo wax ku oolnimada daryeelka, ama la joojitaanka la kormeeray, caruurta ku jira daryeelka ilmaha. Tani waxaa kamid noqon kara balse aan ku koobneyn:

a. Go'aanka ay soo saartay ALJ:

b. Go'aanka, ama natiijada ugu danbaysa ee hay'adaha kadib baadhitaanka;

c. Talaabo hay'ad oo lid ah, waxaa kamid ah joojinta rasmiga ah, la noqoashada, ama diidmada liisanka ama shahaadada, ama hadii ay socoto dacwad talaabada hay'ada, si ikhtiyaar ah iskaga soo celinta liisanka, shahaadada ama heshiiska halkii talaabo lidi ah ay iman lahayd;

d. La noqoshada, diidmada ama xadidaada lagu soo rogay wixii liisan xirfadle ah; ama

e. Go'aanka kama danbaysta ah ee gudida anshax marinta.

Lagama qaadan rafcaan: Hadii aanu jirin wax rafcaan ahi, waxa uu ka dhigan yahay in talaabada hay'ada ay weli sii jiri doonto. Waraaqaha sharciga ah ee kiisaska liisanka ayaa u sheegaya bixiyayaasha hadii ayna doonaynin shagaysiga gobolka OAH, talaabada inay dhaqan geli doonto laga bilaabo 28 maalmood kadib marka ay soo gaadho warqadu. Waxa kaliya ee laga soo reebayaa waxaa weeye guudmarka joojinta, taas oo dhaqan geleysa isla markaba. Hadii bixiyaha aanu ku doonan dhagaysi 28 maalmood oo ah marka ay soo baxaan joojinta guudmarku, talaabada ayaa noqonaysa kala danbaysta oo sii jiri doonta.

Lala noqday: Si loo joojiyo talaabada. Marka talaabada sharci laga noqdo, waxay ka dhigan tahay in aan wixii intaa ka danbeeya la gelin doonin duwaanka bixiyaha. Ka noqoshada guudmarka joojinta badanaa waxay daba socotaa qaaditaanka guudmarka joojinta wakhtiga marka hay'ada ay hayso dhamaan macluumaadka loo baahan yahay si loo go'aamiyo in aan la beegsan doonin guudmarka joojinta.

Ka heshiinta: Heshiiska in la soo gunaanado muranka oo ay keento meesha ka saar kumeel gaadh ah wixii sharci ee la xidhiidha.

Jooga: "Jooga" waxay weeye talaabada ay qaado maxkamadu si loo joojiyo dhaqan galka dacwada sharci ee talaabooyinka dhinaca. Waxaa loo adeegsadaa guudmarka joojinta. Bixiyaha doonaya inuu shaqeeyo inta uu socdo rafcaanka joojinta guudmarku waxay ka dalban karaan gobolka OAH inuu soo saaro joogitaanka guudmarka joojinta. Hadii joogitaan la soo saaro, bixiyaha waxa uu sii shaqayn karaa inta la wado dhagaysiga si loo go'aamiyo hadii guudmarka joojinta si sax ah loo dabaqay.

Sii Wadista: Si loogu xukumo in go'aanka sharciga ah uu yahay ka saxda ah oo loo go'aamiyo in aan la badalin talaabada sharciga ah.

Wixii macluumaad ku saabsan diyaarinta dhagaysiga DCYF, booqo: **https://oah.wa.gov/case-preparation/hearings/department-children-youth-families**

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan shuruucda iyo qawaaniinta liisanka daryeelka ilmaha, booqo: **www.dcyf.wa.gov/practice/policy-laws-rules**

Su'aalo?

Kala xidhiidh liisan bixiyahaaga, ama Xafiiska Waxbarashada Hore iyo Daryeelka Ilmaha ee deegaanka, **www.dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices**